
# BARNEVERNET

## TIL BARNETS BESTE



## HAY'ADDA DARYEELKA CARRUURTA WAA MID CARRUUTA U WANAAGSAN

BARNE- OG FAMILIEDEPARTEMENTET

*Wasaaradda qoyasaska iyo carruurta*

MAADINTA CARRUURTA

SIDA CARRUURTA U WANAAGSAN

WASAARADDA QOYSKA IYO CARRUURTA

Daryeelka iyo barbaarinta carruurta ee Noorweey waa xil marka hore waalidka saaran. Laakiin mararka qaarkood ayay waalidku caawin u baahan karaan si ay carruurtooda u daryeelaan. Waalidku muddo gaaban ama mid dheer ayay caawin u baahan karaan, iyagoo xaalad nololeed oo adag ku sugan awgeed. Waxaa laga yaabaa in aanay keligood ilmaha siin karin daryeelka iyo kalsoonida ilmuhu u baahan yahay. Markaas ayaa maadinta carruurtu xil ka saaran yahay inay caawin bixiyaan.

> ”Waan isla soo qaadnay inaan maadinta carruurta la xiriirno, laakiin waan jahawareernay oo taas waa awoodi weynay”

Hadalka noocan ah marmar ayaan maqalnaa. Markaad aabbe ama hooyo tahay waxaa laga yaabaa inaad ka yara cabsato la xiriiridda maadinta carruurta. Markaad qaraabo, deris, macallin iwm. ah tahayna, waxaa laga yaabaa inaad ka walaacsan tahay ama ka cabsanayso faragelinta aad samaynayso, kana welwelsan tahay dhibka kaaga imaan kara farriin maadinta carruurta loo gudbiyo.

Natiijadu waxay noqonaysaa in carruur iyo waaliddiin badani aanay helin caawinta iyo kaalmada ay u baahan yihiin ee sharcigu u oggol yahay.

Sidaas awgeed ayay tahay inaad maadinta carruurta la xiriirto haddii shaki ku galo. Maadinta carruurtu waxay marka ugu horreysa caawin ku bixisaa guriga si ay waalidka iyo carruurta ugu suurtagasho inay sii wada noolaadaan. Marar badan oo daryeelka carruurta lala wareego ayaa taas laga hortegi karay haddii waalidka laftigooda ama dad kale ay maadinta carruurta la soo xiriiri lahaayeen goor hore.

Buuggan yari wuxuu fikrad kooban kaa siinayaa maadinta carruurta, iyo waxa ay taasi u qaban karto carruurta.

WAA MAXAY MAADINTA CARRUURTU?

Maadinta carruurtu waa dammaanad hubinaysa in carruurta iyo dhallinta oo dhammi ay helaan xannaano, ammaano iyo fursad ay ku barbaaraan.

Xilka iyo hawlaha shaqada ee maadinta carruurtu waxay ku yaallaan sharciga adeegga maadinta carruurta. (Sharcigii 17kii luuliyo ee 1992dii, lmr. 100.) Adeegga maaddinta carruurta ee degmada ayaa mas’uul ka ah maadinta carruurta.

Hawsha gaarka ah ee maadinta carruurtu waa daryeelidda carruurta kuwooda khatarta ugu badan ku jira. Waxay carruurta ka ilaalinayaan in la daryeeli waayo, waxayna ka hortagayaan in dhibaato jireed ama mid maskaxeed ay carruurta soo gaarto. Haddii maadinta carruurtu ogaato arrin noocan ah, sharciga ayaa ku waajibinaya inay isla markiiba baaraan xaaladda ilmaha, haddii ay muhiim noqotana hawlgal fuliya. Sida sharciga dhigayo waxaa adeegga maadinta carruurta waajib ku ah inuu farriinta isla markiiba eego, haddii ay muhiim noqotana,

uu baaritaan hoose sameeyo saddex bilood gudahood. Haddii ay muhiim tahay in hawlgal la fuliyo, waxaa taas la samaynayaa ugu danbeyn 6 toddobaad kaddib markii baaritaanku dhammaaday. Iyadoo sababtu tahay in sharci-dejiyeyaashu ay muhiim u arkaan in carruurtu caawin helaan, ayaa degmada la ganaaxi karaa haddii aan wakhtiyada la doonayo in hawlaha lagu qabto la xafidin.

Shaqada maadinta carruutu waxay isugu jirtaa kaalmo iyo ilaalin. Caawin iyo kaalmo ayay bixisaa si ay guriga ugu suurtagasho inuu ka soo baxo xilkiisa barbaarin, laakiin waxaa waajib ku ah inay guriga faragelin ku samayso haddii caawintaasi wax tari weydo.

Maadinta carruurta ayaa xilka guud ka saaran yahay carruurta dhibaataysan. Taasi lama mid ah in maadinta carruurtu hawsha keligeed ku ahaanayso. Qaybaha kale ee dawladda iyo dadka takhasuska leh laftigooda xil baa ka saaran in carruuraha iyo qoysaska u baahani ay caawin helaan.

Xataa dadka shakhsiyaadka ah xil baa saaran. Kani ma aha xil qaanuuneed, laakiin waa xil-dammiireedka naga saaran dadkoo idil, gaar ahaan carruurta.

## KIIS U GUDBINTA MAADINTA CARRUURTA

Kiisas badan oo maadin-carruureed ayaa waxay ku billowdaan in waalidku maadinta carruurta la soo xiriiraan. Laakiin adeegga maadinta carruurta waxaa kaloo aad ula soo xiriira shaqaalaha dawladda, deriska, qoyska iyo dad kale oo carruurta u welwelsan.

Farriimahoo idil waa la eegaa, haddii ay sabab keenta jirtana, hoos baa loo sii guda galaa oo waa la baaraa. Qoyska ay arrintu khuseyso waa lala socodsiiyaa oo waxaa loo sheegaa in adeegga maadinta carruurtu arrinta ku hawllan yahay, haddii ay suurtagal tahayna waxaa laysku dayaa in wadashaqayn la yeesho.

Shakhsiyaadku iyagoo qarsoon ayay kiisas u gudbin karaan maadinta carruurta. Taasi waxay la micno tahay inay maadinta carruurta la socodsiiyaan inay ilmo u welwelsan yihiin, laakiin ay doonayaan in cidda ay yihiin qoyskaas laga qariyo.

Maadinta carruurtu waxay jeceshahay in dadku dibedda isa soo dhigaan oo aanay is qarin. Laakiin inkastoo dadku doonayaan inay is qariyaan, waxaa maadinta carruurta waajib ku ah inay kiiska u baaran sidii caadiga ahayd. Maadinta carruurtu way qarin kartaa magaca, laakiin dadka kama dayn karto waajibka markhaatiga marka kiiska looga baaraandegayo guddiga gobolka ama maxkamadaha. Markaas waa in la sheegaa cidda kiiska soo sheegtay.

Mas'uuliyiinta dawladda iyo shaqaalaha dugsiyada, xannaanooyinka carruuraha iyo adeegga barbaarinta maskaxiyanka (PP-tjeneste), waxaa iskood u saaran waajib ah inay isku dayaan inay wax ka qabtaan haddii ilmo dhibaato haysato. Haddii mas'uuliyiinta dawladdu ka shakiyaan in ilmaha loo geysto daryeel xumo ama si xun loola dhaqmo ama la faraxumeeyo, waxaa waajib ku ah inay kiiska u gudbiyaan maadinta carruurta. Mas'uuliyiinta dawladdu ma dooni karaan in la qariyo.

Sida sharcigu dhigayo xataa shakhsiyaadka iyo hay'adaha uu saaran yahay waajibka sirqarinta ee xirfaddooda la xiriira waxaa waajib ku ah inay maadinta carruurta soo wargeliyaan mararka noocan oo kale ah. Tani waxay tusaale ahaan khuseysaa dhakhaatiirta, cilminafsi-yaqaannada, kalkaalisooyinka caafimaadka, ummulisooyinka iwm.

Caadi ahaan dhibaato weyn ayaa jirta marka kiis loo gudbinayo maadinta carruurta. Waxaa loo baahan yahay in laga hor tago in dhibka ilmaha gaarayo uu sii weynaado. Sidaas awgeed waxaa inta badan fiicnaan lahayd in maadinta carruurta kol hore lala soo xiriiro.

## SIDEE BAY MAADINTA CARRUURTU U SHAQAYSAA?

Marka maadinta carruurtu hesho farriin sheegaysa shaki sababeysan oo laga shakisan yahay in daryeel xumo jirto, waxaa waajib ku ah inay arrinta u baaraan sida ugu fiican ee suurtagalka ah.

Marka hore waxaa lala xiriira ciddii farriinta soo gudbisay si aqoon dheeri ah loogu yeesho sababta xiriirka. Ma wax uu qofka farriinta soo gudbiyey arkay baa, mise waa wax uu dad kale ka maqlay?. Ma waxaa jira waxyaalo la taaban karo oo la arkay, mise qiyaas bay farriintu ku dhisan tahay?

Sida dhacdaba maadinta carruurtu waxay codsataa oggolaasho in tixraac ahaan loo isticmaalo xiriirka. Haddii qofkii farriinta soo gudbiyey oo farriintii la noqdo, waxay maadinta carruurtu ka baaraandegtaa si kastaba in arrinta la sii wado.

Haddii maadinta carruurtu doorato inay arrinta guda galaan, waalidka ayaa xafiiska wadahadal loogu yeeraa, ama waxaa loo diraa warqad loogu sheegayo in guriga lagu soo booqan doono. Haddii carruurtu yaryar yihiin, waalidka oo keligood ah ayaa lala hadlaa. Haddii arrintu khuseyso carruur waaweyn iyo dhallinyaro, inta badan wadahadalka way ka qayb qaataan.

Waaliddiinta ayaa lagu wargeliyaa farriinta, loona oggolaada inay akhriyaan. Markaas kaddibna waxaa laga hadlaa wixii farriintu sheegaysay. Maadinta carruurta ayaa sheegta inay la xiriiri doonto hay'adaha kale ee ilmaha yaqaanna, sida rugta caafimaadka, xannaanada carruurta, dugsiga, adeegga PP-ga, iwm. Waalidka waxaa loo sheegaa xuquuqdooda, sida inay xaq u leeyihiin inay warbixinta laga qoro arkaan.

## GOORMEY MAADINTA CARRUURTU FARAGELIN SAMAYNAYSAA?

Barbaarinta iyo daryeelka carruurtu waa xuquuq waalidku leeyihiin waajibna ku ah. Carruur waxaa loola jeeda dadka 18 sano ka yar. Haddii hay'ad dawladeedi arrintan fara gelinayso, waa inay sharciga qiil ka haysataa. Sharciga maadinta carruurta iyo sharciga maammulka ayaa dhigaya go'aammada ugu muhiimsan ee arrintan la xiriira. Dhammaanba go'aammadan waxay oggol yihiin in garashada la isticmaalo ilaa xad.

**Waajib ayay maadinta carruurta ku tahay inay faragelin sameyso marka:**

- ilmuhu baahi dheeri ah u qabo caawin wax loogu qabanayo xaaladda guriga ka jirta ama xaalado kale awgood.
- ay waxyaalo waaweyn ka maqan yihiin daryeel-maalmeedka ilmaha, ama uu aad u hooseeyo xiriirka iyo kalsoonida uu ilmuhu helo oo uu ka hooseeyo kuwii la rabay ilmo da'diisa iyo korriimadiisa leh inuu helo.
- aanay waalidku hubin/karin in ilmo jirran, naafo ah ama si gaar ah caawin ugu baahan loo daboolo baahida gaarka ah ee uu qabo in la daaweeyo ama wax la baro.
- ilmaha si xun loola dhaqmo/la faraxumeeyo ama xadgudub weyn guriga loogu geysto.
- inay aad ugu badan tahay in caafimaadka iyo korista ilmaha uu dhaawac weyn gaari karo, waalidka oo aan mas'uuliyad fiican ilmaha ka qaadi karin awgeed.
- Ilmuhu leeyahay dhibaato habdhaqan oo khatar ah
  - la galo denbi khatar ah ama marar badan denbi la galo
  - maandooriyayaal si xun oo joogto ah la isticmaalo ama si kale

Haddii maadinta carruurtu ogaato waxyaalo caynkan ah, waxaa ku ah waajib inay markiiba baaritaan hoose samayso.

## SIDA CARRUURTA U WANAAGSAN

Mabda' muhiim ah oo la xiriira shaqada maadinta carruurta ayaa wuxuu yahay in hawlgalka la samaynayo ahaado mid carruurta u wanaagsan.

Haddii danta waalidka iyo midda ilmuhu iska soo horjeedaan, waxaa sidaas darteed muhiimadda koowaad leh danta ilmaha. Arrintani waxay ku caddahay sharciga maadinta carruurta. Si kastaba, maadinta carruurtu waxay had iyo jeer isku deyeysaa inay iyaga iyo waaliddiinta wadashaqayni ku dhex marto hawlgallada la qorshaynayo.

## HAWLGAL KA HORTAG AH

Sida caadiga ah ilmaha waxaa ugu fiican inuu gurigooda ku koro. Sidaas darteed waxay maadinta carruurtu had iyo jeer marka hore eegeysaa inay suurtagal tahay in qoyska laga caawiyo sidii ay u wada noolaan lahaayeen, iyadoo loo fidinayo hawlgal ka hortag ah. Haddii aan qoysku wadashaqayn doonayn, waxaa si khasab ah lagu hirgelin karaa hawlgallada ay ka mid yihiin boos xannaano carruur iyo guriga oo lagula socdo. Hawlgallada ka hortagga ah waxay noqon karaan:

- Talo iyo hagis qoyska la siiyo, tusaale ahaan ayadoo qof kormeere ah loo sameeyo.
- Kaalmo dhaqaale oo ilmaha la siiyo si ay ugu suurtagasho inuu ka qayb qaato firfircooniyada marka firaaqada la yahay la qabto iwm.
- Nasin iyadoo guriga lagu caawinayo ama la siinayo boos xannaano carruur, meesha carruurtu tagaan markay dugsiga ka soo baxaan iwm.
- Xiriir caawiye (støttekontakt).
- Guri la booqdo (besøkshjem)

Waxaa jira hawlgallo/habab kale oo ku salaysan in caawinta ilmaha ama qofka dhallinta yar loo fidinayo ay dhacdo iyadoo waalidku taageerayo si firfircoonna uga qaybqaadanayo. Tani waxay noqon kartaa ka qaybqaadasho kooxo hooyooyin ama kooxo iyagu naftooda caawiya iyo hawlgallada kale ee dadka goobahooda ka dhaca.

Mararka qaarkood waxaa lagamamaarmaan noqon karta in hawlgal la fuliyo iyadoo aan waalidka oggolaasho laga haysan.

## DEJIN MEEL AAN GURIGA AHAYN

La wareegista daryeel carruuri waxay dhacdaa marar gaar ah oo keliya. Daryeel la wareegid waa tallaabo ilmaha iyo waalidkaba aad ugu adag. Sidaas awgeed, waa inay jiraan sababo aad muhiim u ah ka hor intaan go,aan noocan ah la gaarin.

Marka hawlgalka ka hortaggu waxba tari waayo ayay meesha soo geli kartaa in ilmaha la geeyo meel aan guriga ahayn. Tani waxay dhici kartaa iyadoo waalidku oggolaadeen iyo iyagoon oggolaanba. Si kastaba haddii laga shakiyo in daryeel-xumo weyni ama si xun ula dhaqmid/faraxumayni jirto, isla markiiba ilmaha waa la kaxayn karaa. Laakiin tani waa dhif, sida caadiga ah waa in marka hore hawlgal laysku dayaa iyadoo waalidka lala shaqaynayo.

Haddii adeegga maadinta carruurta iyo waalidku isku raacaan in ilmaha in muddo ah la geeyo meel guriga ka baxsan, waxay taasi dhici kartaa iyadoo aan adeegga maadinta carruurtu ilamaha si rasmi ah daryeelkooda ula wareegin.

Arrinta la xiriirta la wareegista daryeelka waxaa diyaarinaya adeegga maadinta carruurta ee degmada, waxaana go'aanka gaaraya guddi-gobboleedka madaxa bannaan ee dawladda hoos taga. Guddiga gobolku wuxuu ka kooban yahay 5 xubnood oo uu sharciyaqaan hoggaamiyo. Waalidku xaq ayay u leeyihiin inay goobjoog ahaadaan marka arrinta laga baaraandegayo, laakiin ma joogi karaan marka talada la soo jeedinayo iyo codbixinta.

Marka daryeelka lala wareegayo waxaa sidoo kale laga baaraandegaa in ilmaha la geynayo guri uu ku koro ama guri carruurta iyo dhallinyaradu ku koraan.
Haddii meelayntu tahay mid muddo gaaban ah oo loo malaynayo in ilmuhu dhowaan qoyskiisii dib ugu laabanayo, waxaa la doortaa meelaha carruuraha lagu koriyo.

Haddii meelayntu tahay mid muddo dheer , waxaa sida caadiga ah la doortaa guri ilmuhu ku koro, iyadoo sababtu tahay in tani u eg tahay qoys caadi ah. Marka ku meelaynta guri lagu koro tahay mid ku salaysan go'aan lagula wareegayo korinta ilmaha, wuxuu sharciga maadinta carruurtu dhigayaa in guriga ilmuhu ku karayo la doorto iyadoo la tixgelinayo jinsiyada ilmaha iyo baahida uu u qabo daryeel iyo inuu wax ku barto bey'ad deggan. Tani waxay la micno tahay in ilmaha la geeyo bey'ad u suurtagelinaysa inuu sii haysto, horumariyana waxyaalaha qof ahaantiisa la xiriira, tusaale ahaan marka la eego su'aalaha la xiriira jinsiyadda iyo diinta.

Haddii xiriirka waalidku ilmaha dhaawici karo, wuxuu guddigu sidoo kale go'aamin karaa in ciwaanka ilmaha laga qariyo waalidka.

Marka ilmo muujiyo habdhaqan aad u xun, wuxuu guddiga gobolku go'aamin karaa in ilmaha la geeyo goob dawladeed si loo daaweeyo. Meelaynta noocan ah waxaa la fulin karaa iyadoo oggolaasho laga haysto ilmaha iyo waalidkaba ama iyadoo aan laga haysan.

Haddii ay ilmaha u roon tahay waxaa la oggol yahay in mararka qaarkood la go'aamiyo in waaliddiinta laga qaadi karo mas'uuliyadda waalidnimo ee ilmaha.

## XUQUUQDA KOOXAHA/XUQUUQDA CABASHADA

Dhammaanba go'aammada uu gaaro adeegga maadinta carruurta ee degmadu, waxaa looga caban karaa guddoomiyaha gobolka. Tani waxay marka horeba khuseysaa go'aammada hawlgalka caawinta ah (hawlgalka ka hortagga ah). Sida uu dhigayo sharciga maammulku muddada la doonayo in cabasho looga qaato go'aammada maadinta carruurtu waa 3 toddobaad. Go'aammada ay gaaraan guddiga gobolku (tusaale la wareegid daryeel) waxaa looga caban karaa maxkamadda degmada si go'aanka loo beddelo. Muddada kamadanbaynta ah ee la doonayo in kiiska maxkamadda lagu hor keeno waa 2 bilood.

Kuwa kiiska isaga soo hor jeeda, waxay leeyihiin xaq ay cabasho ku qaataan iyo mid ay wax ku dacweeyaan. Tani waxay ugu horreyntaba khuseysaa waalidka carruurta marka ay qayb ku leeyihiin mas'uuliyadda waalidnimo ee ilmaha. Ilmaha laftigiisu kiiska qayb buu uga jiraa markuu 15 sano ka weyn yahay fahansan yahayna waxa kiisku ku saabsan yahay. Xataa marka ilmuhu 15 sano ka yar yahay, way dhici kartaa in guddiga gobolka ilmaha siiyo xuquuq uu/ay kiiska qayb uga noqdo/noqoto. Haddii kiisku ku saabsan yahay hawlgal loo samaynayo ilmo dhibaato dhaqanxumo hayso, mar kastaba kiiska qayb ayuu ka yahay, da'dii uu doono ha jiree.

Xataa haddii aan ilmuhu kiiska qayb ka ahayn waa la wargelinayaa oo lala tashanayaa marka ilmaha korriinkiisa, garaadkiisa, da'diisa iyo nooca kiisku ay suuragelinyaan. Marka ilmuhu 12 sano buuxsho, waa in ilmuhu mar kasta codkiisa dhiibtaa ka hor intaan

la gaarin go'aan lagu geynayo guri uu ku koro, goobaha carruurta lagu koriyo ama ka rarista danbe ee meelahaas.

Qareen ayaa matali kara dadka kiiska qaybta ka ah. Dawladda ayaa bixinaysa kharashka qareenka ee kiisaska looga baaraandego guddiga gobolka iyo haddii kiisku dib ka gaaro maxkamadaha.

Buugaag kale waxaad ka heli kartaa xafiiskaaga bulshada ama guddoomiyaha gobolka.

**Wasaaradda carruurta iyo qoyska**

Waxaa soo saaray:
Wasaaradda qoyasaska iyo carruurta

Xafiisyada dawladdu waxay nuqullo kale
oo daabacaddaan ah ka dalban karaan:

Statens forvaltningstjeneste
Informasjonsforvaltning
Postboks 8169 Dep, 0034 Oslo
Telefaks: 22 24 27 86
E-post adresse: ifa3-bestilling@ft.dep.no

Trykk: www.kursiv.no
Opplag: 5 000
Publikasjonsnummer: Q - 0801 SO

